


# Nadiifinta Goobta Snopac Property



Muuqaalka hawada ee hantida Snopac

## Faalooyinka la aqbalay

Ogosto 28 – Oktoobar 26, 2023

## Kusoo gudi faalooyin

**Khadka tooska ah:**

[www.bit.ly/Ecology-Snopac-Comments](http://www.bit.ly/Ecology-Snopac-Comments)

**Ama boostada:**

Sandra Matthews, Maamulaha Gobalka

WA Department of Ecology  
PO Box 330316

Shoreline, WA 98133-9716  
425-223-1999

[Sandra.Matthews@ecy.wa.gov](mailto:Sandra.Matthews@ecy.wa.gov)

## Goobaha soo bandhiga dhukumiintiga

[www.bit.ly/Ecology-Snopac](http://www.bit.ly/Ecology-Snopac)

Seattle Public Library  
New Holly Branch  
7058 32<sup>nd</sup> Ave South  
Seattle, WA 98118

Wixii caawimaad ah ee soo bandhiga dhukumiintiga, fadlan la xiriiir:

Augie Nuszer, Takhasuslaha Wacyigalinta

[Augie.Nuszer@ecy.wa.gov](mailto:Augie.Nuszer@ecy.wa.gov)  
425-533-5537.

## Mcluumaadka goobta:

Aqoonsiga Goobta Xarunta: 1523145  
Aqoonsiga Nadiifinta Goobta: 12463

## Dhukumiintiyada waxay diyaar u yihiin inay dadweyaha loo soo bandhigo oo ay ka faalo bixiyaan

Department of Ecology (Ecology) waxay kugu martiqaadaysaa inaad dib u eegto oo aad faalo ka bixiso dhukumiintiyada dhowr ah oo la xiriira nadiifinta goobta Snopac ee ku teedsan Lower Duwamish Waterway.

## Baaritaanka Dib u habaynta Daaweyn ahaaneed (RI) iyo Daraasada Suurtagalnimada (FS)

waxa diyaariyey 5055 Properties LLC (5055 Properties) oo ay kormeerayso Ecology. Waxay qeexaysaa aagagga u baahan daaweyn, waxay aqoonsataa oo qiimeysaa noocyo badan oo ka mid ah beddelka waxqabadka nadiifinta, waxayna caddaysaa habka la door biday ee wax looga qabanayo nadiifinta.

**Heshiiska sharciga** (sharciga lagu heshiiyey) ee u dhexeeya Ecology iyo Qofka Mas'uulka Ka noqon kara (PLP), 5055 Properties, wuxuu u baahan yahay tallaabada ku meel-gaar ah ee la dhamaystiray iyo RI/FS inay diyaar u ahaato dib u eegis, iyo horumarinta ficil nadiifin qabyo ah qorshe ku salaysan natiijooyinka RI/FS.

## Guriga bandhiga iyo kulan dadweyne oo isku wakhti ah

Bay'adu waxay qaban doontaa guri furan iyo kadibna kulan foolka-fool/onleyn ah oo lagu muujinayo oo uu joogo turjubaan luuqadaha Isbaanish, Shiinays, Fiitnaamiis, Khmer, Soomaali, iyo Amxaari.

## Khamiis Sebteembar 7eeda, 2023:

- **Guriga Bandhiga:** 5:30 galabnimo.
- **Bandhiga:** 6:30 galabnimo.
- **Kulanka Fool-ka-foolka ah:** South Seattle College, Main Campus, 6000 16th Avenue SW, Seattle WA
  - Turjubaan ayaa lagu heleyaa taleefanka casriga ah iyo sameecadaha dhagaha la gashto. Ecology waxay haysaa taleefano iyo sameecadaha dhagaha la gashto oo kooban si ay dadka uga qaataan.
- **Kulanka Khadka Tooska ah:** Iska duwaangeli khadka tooska ah oo kaga biir Zoom ka [www.bit.ly/Ecology-Snopac](http://www.bit.ly/Ecology-Snopac)
  - Turjumaada ayaa laga heli doonaa Zoom ka

# Barnaamijka Nadiifinta Wasakhda

## Taariikhda

Snopac Property waxay ku taalaa 5055 East Marginal Way South in Seattle. Waxay qiyaas ahaan 1.3 hektar daanta bari ee Lower Duwamish Waterway (LDW), dhinaca hore ee Slip 1. Olympic Lighterage Company ayaa goobta u isticmaalay hawlo safrinta alaabta laga soo bilaabo 1935 ilaa 1940. Shirkadda Jiistada Pioneer ayaa ku jiray dhismayaasha oo ay adeegsatay taangiyada kaydinta dhulka hoostiisa (USTs) laga bilaabo 1935 ilaa 1970. Marine Leasing/Marine Logistics oo xiriir la leh Marine Power & Equipment u isticmaalay bakhaarka kaydinta agabka badda oo si sharci darro ah ku tuuray agabka carada balasta (SBG) ee goobta intii u dhaxaysay 1973 iyo 1988. SBG ga wasakhaysan waxaa lagu kharash gareeyay nadiifinta doonyaha iyo hawlaha dayactirka. Snopac Products Inc. waxay ku shaqaynaysay xarunta baakadaynta kaluunka ee dhismaha 1992 ilaa 2008. 2008 way soo rareen ganacsiga, iyagoo ka tagay dhismaha iyo bakhaarkii banaana. 5055 Property LLC ayaa iibsatay guriga 2012 waxayna dumisay bakhaarkii goobta 2019.


## Baaritaanka Dib u habaynta Daaweyn ahaaneed: Baaritaanka wasakhaynta:

Goobta Snopac waxay ka kooban tahay goobo deegaan ah, goob biyo hoos u fariistaan, iyo goob haraaga biyo fadhiisad ah. Wasakhda goobtan waxaa laga helaa carada, biyaha dhulka hoostiisa, iyo wasakhda fadhiisatay.


Wasakhda walaaca leh (COCs) waa:

- Biro
- Polychlorinated biphenyls
- Polycyclic aromatic hydrocarbons
- Pentachlorophenol
- Tributyltin Ion
- Total petroleum hydrocarbons

Isha ugu horaysa ee wasakhda goobta waxaa lagu kharash gareeyay carada balastada (SBG) kaas oo ka kooban rinjiga qashinka. SBG-gu waxa uu ka kooban yahay biraha caadiga ah ee wasakhda, oo laga keeno meel ka baxsan goobta. Nabaad-guurka walxahan ee kaydka (goobta jaalaha ah, Sawirka 1) ayaa wasakhda u soo badalay wasakh dul fuusha (goobta buluuga ah, sawirka 1).



Sawirka 1: Goobta iyo wasakhawga



Sawirka 2: Baaxada talaabada ku meel-gaarka ah ee 2020-2021

## Talaabada ku meel-gaarka ah

Talaabo ku meel-gaarka ah (nadiifinta qayb) ayaa lagu dhameeyay goobta intii u dhaxaysay Diseembar 2020 iyo Janaayo 2021. Darbi xeebeedka ayaa lagu rakibay ilaa 45 fiit oo ka hooseeya oogada dhulka ee dhanka xeebta galbeed ee guriga si uu u taageero wejiga xeebta. Ku dhawaad 6,000 oo tan oo ciid wasakhaysan SGB ayaa laga saaray dhinaca dhulka ee gidaarka xeebta waxaana la tuuray meel ka baxsan goobta. Kormeerka biyaha dhulka hoostiisa ku jira ee la sameeyay kadib saarista ayaa muujisay uruurinta COC-yada oo yaraatay, taasoo tusinaysa in tallabada ku meel-gaarka ahi ay ku guulaysatay yaraynta wasakhda soo gasha webiga.



## Barnaamijka Nadiifinta Wasakhda

### Ikhtiyaarka La Door-biday ee Talaabada Nadiifinta


Si wax looga qabto goobaha u baahan dib u habayn daaweyn ahaaneed, waxaa la sameeyay Daraasad Suurtagalnimada (FS). Dhukumiintigani wuxuu qiimeeyaa oo isbarbar dhigayaa faa'iidooyinka deegaanka iyo kharashyada beddelka nadiifinta wuxuuna tilmaamayaa beddelka ficil nadiifinta ee la door-bidayo. Ikhtiyaarka talaabada nadiifinta ee la door-biday ee Uplands Area (Sawir 3) ayaa lagu qeexay hoos.

Ecology waxay wax ka qaban doontaa Sediment Area FS mustaqbalka. Shaqada biyaha dhexdeeda waxaa kormeeri doona EPA taasoo qayb ka ah nadiifinta Lower Duwamish Waterway. Ikhtiyaarka beddelka ee la door biday waxaa dooratay EPA iyadoo lagu salaynayo xogta lagu soo koobay [Daraasada Suurtagalnimada ee Lower Duwamish Waterway](#)<sup>1</sup> (AECOM 2012) iyo [Diwaanka Go'aanka ee Lower Duwamish Waterway](#)<sup>2</sup> (USEPA 2014).

### Talaabada Upland Area

Suurtagalnimada Daraasada Upland waxay soo bandhigaysaa qiimaynta tignoolajiyada nadiifinta wasakhawga goobta. Tignoolajiyada nadiifinta ee lagu qiimeeyay goobtan waxaa kamid ah:

- **Ka Saaritaanka:** Qoditaanka iyo ku tuuritaanka goobaha ka baxsan ee alaabta wasakhaysan.
- **Daaweynta Goobta:** Wuxuu adeegsadaa habab jir ahaaneed, bayooloji, iyo/ama kiimiko si uu u beddelo ama u burburiyo sunta la beegsanayo.
- **Ku Dhimitaanka Habab Dabiici ah ee La kormeeraya Wasakhda (MNA):** Dhimitaanka uruurinta wasakhaysan wakhti kadib iyada oo loo marayo hababka dabiiciga ah sida roobka, kala-soocida, biyo ku shubitaanka, kala firdhisanaanta, iyo/ama adeegsiga kiimiko.
- **Xakamaynta Machad ahaaneed (ICs):** Tallaabooyinka maamulka ama injineernimada ee la qaaday si loo xaddido ama loo mamnuuco dhaqdhaqaaqyada laga yaabo inay farageliyaan ficilka nadiifinta ama ay keenaan soo gaaritaanka waxyaabo wasakhaysan.



Sawirka 3: Habka Badelka ah ee 1 ee la Doorbiday ee Uplands Area

Upland FS waxay qiimeeyeen sadex ikhtiyaar oo lagu daaweyn karo si loo nadiifiyo wasakhda qaybta sare ee goobta Snopac.

- Habka Badelka ah ee 1: Ka saarida SBG, Ka Saaritaanka Qayb kamid ah Alwaax, Groundwater Monitored Natural Attenuation (MNA), IC-yada
- Habka Badelka ah ee 2: Ka saarida SBG, Ka Saaritaanka Alwaax dhamaystiran, Groundwater Monitored Natural Attenuation (MNA), IC-yada
- Habka Badelka ah ee 3: Ka saarida SBG, Ka Saaritaanka Alwaax dhamaystiran, Daaweynta Biyaha Dhulka Jiifa iyo MNA, IC-yada

Habka bedelka ee loo doorbiday ee Upland FS waa Ikhtiyaarka 1. Tallaabada ugu dambaysa ee nadiifinta ee qaybta kore ee goobta waxaa dooran doona Ecology oo lagu faahfaahiyay Qorshaha Waxqabadka Nadiifinta sare.

<sup>1</sup> [https://ldwg.org/wp-content/uploads/2019/01/LDW-Final-FS-Executive-Summary\\_October-31-2012\\_ADA.pdf](https://ldwg.org/wp-content/uploads/2019/01/LDW-Final-FS-Executive-Summary_October-31-2012_ADA.pdf)

<sup>2</sup> <https://semsub.epa.gov/work/10/715975.pdf>


## Barnaamijka Nadiifinta Wasakhda

### Maxay midani muhiim u tahay

Goobta Snopac waxay ku dhagan tahay [Lower Duwamish Waterway](#)<sup>3</sup> Superfund Site, oo waxay isla noqonayaan 5 mayl oo saaran Duwamish River. Hay'ada Ilaalinta Deegaanka Maraykanka (U.S. Environmental Protection Agency, EPA) waxay ku jirtaa [LDW Superfund Site](#)<sup>4</sup> ilaa Liiska Hantiyaha Qaran ee Superfund ee 2001. Bay'ada waxay ka shaqaynayaan sidii ay u joojin lahaayeen ama u yarayn lahaayeen isha wasada ee LDW Superfund Site, dadaal loo yaqaan ["xakamaynta isha"](#)<sup>5</sup>, si markaa EPA ay u qaban karto nidaamka ka nadiifinta wasakhda wabiga.



Sawirka 4: Muuqaalka Lower Duwamish Waterway



### Maxaa ku xiga?

[Habraaca nadiifinta](#)<sup>6</sup> Washington's formal Model Toxics Control Act (MTCA) ayaa lagu muujiyay sawirada kore. Upland Area waxay ku jirtaa baaritaanka daaweyn ahaaneed/tallaabada daraasadda suurtoogalka ah. Faallooyinka dadweynaha ayaa wax laga qaban doonaa inta lagu jiro xilliga faallooyinka iyo RI/FS waa la dhammeyn doonaa. Ecology waxa kale oo ay soo saari doontaa qorshe hawleed nadiifin ah oo ku salaysan macluumaadka ku jira RI/FS ee u dambeeya oo ay u sii dayn doonto fikradaha dadweynaha.

<sup>3</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-sites/Lower-Duwamish-Waterway>

<sup>4</sup> <https://cumulis.epa.gov/supercpad/cursites/csitinfor.cfm?id=1002020>

<sup>5</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-sites/Lower-Duwamish-Waterway/Source-control>

<sup>6</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-process>

Toxics Cleanup Program  
PO Box 330316  
Shoreline, WA 98133-9716

## Nadiifinta Goobta Snopac Property Dhukumiintiyada waxay diyaar u yihiin inay dadweyaha loo soo bandhigo

Información en Español incluida (página 5)

有關的信息, 已被翻譯成中文 (第5頁)

Có thông tin bằng tiếng Việt (Trang 5)

ព័ត៌មានជាភាសាខ្មែរអូមក្ស (ទំព័រ 5)

Macluumaad af Soomaali ah ayaa la socda (Boga 5)

በአማርኛ የተጻፈ መረጃ ተካቷቷል (ገፅ 5)

**Mudada faalo ka dhiibashada dadweynaga**

Ogosto 28, 2023 – Oktoobar 26, 2023

[www.bit.ly/Ecology-Snopac-Comments](http://www.bit.ly/Ecology-Snopac-Comments)

**Munaasabada dadweynaha – Eeg Boga 1 wixii  
faahfaahin**

**ah Sebteembar 7, 2023, Laga bilaabo abaare 5:30 galabnimo**

Wixii macluumaad dheeraad ah: [www.bit.ly/Ecology-Snopac](http://www.bit.ly/Ecology-Snopac)

### Helitaanka ADA

Si aad u codsato habaynta ADA, kula xiriir Ecology talefoon ahaan lambarka 425-533-5537 ama iimaylka

[Augie.Nuszer@ecy.wa.gov](mailto:Augie.Nuszer@ecy.wa.gov), ama booqo [ecology.wa.gov/Accessibility](http://ecology.wa.gov/Accessibility). Adeegyada Dadka Naafonimo qaba ama TTY ka wac 711 ama 877-833-6341.

